# Masaaridii hore iyo wabiga Niilka

Dhulka intiisa ugu badnayd ee Masaaridii hore waxaa qariyey saxare. Wabiga Niil la'aantiisa suuragal u may ahaateen bani'aadamka inay halkaas ku noolaadaan. Niilku waa wabiga adduunka ugu dheer, wuxuuna dhex maraa wadamo badan. Wuxuu ugu balaadh weynyahay marka uu dhexmarayo Masar, halkaasna uu ku dhamaado badda dhexe.

Sida Mesobotamiya wuxuu webigu u ahaa muhiim beeraha iyo badbaadada bani'aadamkaba. Masar waxay daadadku iman jireen xilli go'an sanadkiiba. Sanad walba marka laga bilaabo luuliyo ilaa oktoobar waxay ahayd xiliga daadadka.

Maadaama dadka masaarida ahi ay ogaayeen xiliga daadadku imaanayaan, waxay ka sii diyaar garoobi jireen iyagoo ku sii xidhaya deyrar magaalooyinka dhinacyadooda Iyo beeraha. Halka biyo xidheenadoodana ay sii madhin jireen. Daadadka aad umay waaweynayn marka loo eego Mesobotamiya

Dad badan oo masaari ahi waxay ahaayeen beeraley. Kuwaas oo raashin beeri jiray, haystay xoolo, ugaadhsi iyo kaluumaysi aadi jiray. Halka qaar kalena ay farsamo yaqaan ahaayeen. Sida fuundiyaal, roodhilayaal, doonyo-dhisayaal iyo birtumeyaal

Beeraha waxay ka beerin jireen beeralaydu geed loo yaqaano lin oo dharka laga sameeyo, kaas oo ay dumarku maryo ka toli jireeen. Wabiga dhinacyadiisa waxay dadka qoyska ahi ka ururin jireen nooc geed gaar ah oo qasab ah, kaas oo layidhaahdo burdi, oo ay ka samayn jireen kabaha sandalka ah, doonyo iyo warqado. Kalmada warqaduna waxay ka timid geedkaas.

Dadka masaarida ahi waxay samaysteen nidaam qoraaleed loo yaqaano hieroglyger . Halka dadka Mesobotamiya ay wax ku qori jireen alwaax dhoobo ah, Masaariduna waxa wax dusha



Tekst og bilder hentet fra Zmekk.no i samarbeid med NAFO – Nasjonalt senter for flerkulturell opplæring

uga qori jireen geedka burdiga ah





*Farshaxan gacmeed oo lagu muujinayo doonyo dhisayaal masaariya iyo sawir nidaam qoraalkii masaaridii hore*

## Fircoon

Boqorka Masar wuxuu lahaa awood badan. Wuxuu degenaa guri quruxbadan, oo qasri ah. Shaqadiisa ugu weynina waxay ahayd inuu ilaaliyo in dadka xaalkoodu fiicanyahay.

Dadka masaarida ahi waxay aaminsanayeen inuu yahay ilaahay wiilkiisii, sidaa daraadeed kuma dhacayn inay ugu yeedhaan magaciisa. Waxay ugu yeedhi jireen fircoon, taas oo ay micneheedu tahay «guri weyn». Qofku inuu fircoon ahaado waxay ahayd dhaxal, taas oo wiilku aabihii dhaxli jiray.

Dadka degeenka ahi waxay ahayd inay siiyaan lacag cashuur ah boqorka. Canshuurta lacag ahaan umay bixin jirin sidaan maanta samayno, balse waxay boqorka siin jireen qayb ka mid ah waxa kasta oo dhulka laga beero, iyo wixii laga heloba. Fircoon wuxuu dhisay biyo xidheeno, kanaalada waraabinta beeraha iyo meelo lagu cibaadaysto. Dadkuna waxay ahayd inay caawiyaan si loo dhamaystiro dhismayaashaas.

## Ahraamta

Masar waxay adduunka caan kaga tahay dhismayaasha ahraamta, kuwaas oo ay ku aasnaayeen qaar ka mid ah boqoradii wadanku. Dadka masaarida ahi waxay aaminsanayeen in ay nololi jirto geerida dabadeed. Sida darteed waxaa muhiim ahayd in boqorka si wacan loo aaso.

Kuwaas oo lagu aasi jiray dahab badan, raashin, maryo iyo hub ay ku isticmaalaan nolosha labaad. Si loo ilaaliyo qofka dhintay jidhkiisa waxa lagu duuduubi jiray qeybo faashado ah, iyadoo laga dhigayo Mayd laga ilaaliyey in uu qurmo (mumier)

Ugu horeyn waxa qofka dhintay loo maydhi jiray si gaar ah, intaas kadibna waxa laga saari jiray maskaxda iyo uur ku jirta, marka laga reebo wadnaha. Halkaas oo lagu ridi jiray weel. Kadibna waxa jidhka la marin jiray boomaato iyo saliid. Ugu danbayna waxa jidhka oo dhan lugu duuduubi jiray faashado xargo ah, naxash gaar ahna waxaa lagu ridi jiray meydka. Kaas oo sawirka qofka dhintay dusha lagaga dhajiyey.



*Muuqaalada Faraaciinta, Haramkii Khawfu iyo mayd laga ilaalinayo inuu qudhmo (mumie)*

Dhowr boqor, oo qaarkood ilaa xad ay niman maal qabeen ah ahaayeen, ayaa lagu aasay ahraamta ay iska leeyihiin. Waxaa laga dhisay ku dhawaad konton ahraamo ah Masar. Kan ugu weyn waxaa la odhan jiray  Haramkii Khawfu oo loogu magac daray boqorkii halkaas lagu aasay; boqor Khawfu oo xilka hayey laga bilaabo 2589 – 2566 dhalashadii Nabi ciise ka hor). Ahraamkaasi wuxuu ku yaala saxaraha Giza, oo ah meel banaanka caasimada wadanka Masar, Qaahiro ku taala. Dooxada boqorka, oo u ku taala dhinaca magaalada Alaqsar waxa kale oo laga helay xabaalo boqoro iyo maydad laga ilaaliyey in ay qurmaan.

## Ma ogtahay?

- 96% ka mid ah Masar inay xaqiiqdii tahay saxare.
- Dhererka webiga Niilku inuu yahay 6500 km.
- Ahraamta Masar in lagu tiriyo inay ka mid yihiin mid ka mid ah todobadda mucjiso ee aduunka! (ma soo heli kartaa lixda kale waxay yihiin)
- Ahraamka Haramkii Khawfu waa 137 mitir dhererkiisu, wuxuuna ka koobanyahay 2 ½ milyan oo dhagax ah.
- Ahraamkaas aan kor ku soo xusnay afkiisa hore wuxuu ahaa dahab.
- Ahraam kale oo caan ah waxa laga helaa wadammada Meksiko iyo Bero
- Budhcadyo fara badan ayaa hanti ka xaday Ahraamta intii lagu guda jiray casriyadaas


Tekst og bilder hentet fra Zmekk.no i samarbeid med NAFO – Nasjonalt senter for flerkulturell opplæring




**laylis**

Si wacan u eeg alfabeetada sare, oo u « turjun» kalmadaha norwijiyaan

 ___________________________________

 ___________________________________________

 _______________________________

 ___________________



Tekst og bilder hentet fra Zmekk.no i samarbeid med NAFO – Nasjonalt senter for flerkulturell opplæring